# WARSIDAHA AGA
# AGA NEWSLETTER

**Waa Warside-Xilliyeed ku Hadla Codka Akadeemiye-Goboleedka Af-Soomaaliga (AGA)**

***A Periodical Newsletter Published by the Intergovernmental Academy of Somali Language***

**Tirsiga 1aad, sannadka 1aad, Janaayo – Maarso 2018**
**ku beegan munaasabadda Maalinta Caalamiga ah ee Afka Hooyo**


# Hadafkayagu waa hiilka afka hooyo iyo hal-abuurkiisa

## WARSIDAHA AGA

Bahda Tifaftirka waxaa sharaf u ah inay akhristeyaasha sharafta leh ku soo dhowayso Warsidaha AGA, oo idiin soo gudbin doona aqoon isugu jirta xog-wadaag, aqoon-wadaag iyo talo-wadaag.

Warsidahan ujeeddooyinka loo aasaasay waxaa ka mid ah in uu ehelada afka, hal-abuurka, dhaqanka, qoraalka iyo aqoon-faafinta ee daafaha dunida kala jooga la socodsiiyo hawlaha iyo dhaqdhaqaaqyada muhiimka ah ee ku saabsan arrimaha kor ku xusan iyo aqoon-kobcin la xiriidha isla arrimahaas. Warsiduhu wuxuu ururiyaa, kaydiyaana dhacdooyinka muhiimka ah iyo waxqabadyada dhaxalgalka ah ee khuseeya arrimaha kore.

Wixii ah fikrado iyo tala-bixin ku saabsan sii hagaajinta, hannaaninta iyo horumarinta warsidaha aad ayaan u soo dhoweynaynaa. Sidoo kale, wararka iyo qoraallada ay soo gudbiyaan qalinleyda iyo ehelada Af-Soomaaligu, gacmo furan ayaan ku soo dhowaynaynaa.

Warsidahani wuxuu ku soo baxaa nuqul daabacan iyo mid elektoroonig ah. Cinwaanka lagala soo xiriirayaa waa:
**Email: info@aga.so**



Halyayga iyo hiilka afka hooyo Madaxweyne Ismaaciil Cumar Geele iyo Madaxweynihii Hore Xasan Shieekh Maxamuud, oo dhagaxdhigaya Xarunta AGA ee Magaalada Muqdisho 21 Febraayo 2015.

## Tusmada Tirsigan


- **ERAYGA TIFAFTIRKA**
  - **Akadeemiya-Goboleedka Af-Soomaaliga: Tilmaan & Taariikh Kooban**
- **QORMOOYIN HORTEBIN MUDAN**
  - **Maalinta Caalamiga ah ee Afka Hooyo**
  - **Raiisul -Wasaare Khayre oo u Hiilliyay Afka Hooyo**
- **KORORSO AQOONTA AFKAAGA IYO HAL-ABUURKIISA**
  - **Ubucda Naxwaha AfSoomaaliga**
  - **Iskudhigid kala Khihid: Awoodda Hab-dhawaaqa ee Beddelidda Micnaha Erayga**
  - **Hodantinimada Afka Hooyo**
- **WARARKA WAXQABADKA AGA**
- **WARAR KALE OO XUSID MUDAN**
- **SUUGAAN:**
  **Hal-Abuurka Afka Hooyo**


---


**GOOSANKA TIFAFTIRKA**

Tifaftiraha Sare:
**Mustafa Cabdullaahi Fayruus**

Agaasimaha:
**Axmed Maxamuud Dhicisow**

Xubnaha tifaftirka
**Saynab Daahir**
**Cabdullaahi X. Shiiqaalow**
**Cabdiraxmaan Abtidoon**
**Cabdullaahi sh. Cabdi**
**Saynab Xaaji Axmed**

Agaasimaha Farsamada:
**Axmed Faarax Saalax**

Kaaliyah Farsamada
**Amiin Yuusuf Khasaaro**

**Waxaad kala xiriiri kartaa :**
**Email:** info@aga.so
**Facebook: @AkadeemiyeGoboleedka Afsoomaaliga**
**Twitter: @somaliacademy**
**Website** www.aga.so


---

# ERAYGA TIFAFTIRKA

# AKADEEMIYE-GOBOLEEDKA AF-SOOMAALIGA:
## TILMAAN IYO TAARIIKH KOOBAN

Akadeemiye-Goboleedka Af-Soomaaliga (AGA) waa xarun aqooneed loo abuuray daryeelka iyo horumarinta Af-Soomaaliga iyo hal-abuurkiisa suugaaneed. Waa madal ay ku bahoobeen dalalka Geeska Afrika ee Soomaalidu degto, AfSoomaaligana lagaga hadlo. Waa madal ay si madax bannaan u maamulaan gole ka kooban aqoonyahanno loo xulay ku xeeldheeridooda dhinacyada kala duwan ee AfSoomaaliga iyo suugaantiisa, kuna shaqeeya naf-hur ay ummadda si mutadawacnimo ah heegan ugu yihiin hiilka iyo horumarinta AfSoomaaliga, oo ah hantida ugu qiime badan ee ay leedahay ummad-weynta Soomaaliyeed. Halkudhegga AGA waa "***Hadafkayagu waa hiilka afka hooyo iyo hal-abuurkiisa***".

AGA waxaa lagu asaasay magaalada Jabuuti bishii Juun 2013. Aasaaskeeda waxaa keenay baraarug lagu baraarugay halis weyn oo ku soo fool yeelatay AfSoomaaliga oo ah astaanta jiritaanka ummadda Soomaaliyeed iyo haybta Soomaalinnimo. Dhanka kalena waa furaha aqoonta aayatiinka u leh ubadka Soomaaliyeed. Halista afkan ku soo fool yeelatay xooggeedu wuxuu ka dhashay burburkii Soomaaliya, Soomaaliya oo ahayd waddankii lagu rasmiyeeyey, laguna hirgaliyey qoraalka AfSoomaaliga, ahaydna waddanka keliya ee uu AfSoomaaligu u ahaa afka rasmiga ah ee qaranka; afka loo adeegsado waxbarashada, maamulka, iyo dhinacyada kale ee adeegga bulshada, dhinacyadaas oo ah rukunnada aan la'aantood afku waari karayn. Halistan waxaa sii xoojiyay burburkii xarumihii adeegsiga iyo horumarinta afkan; qaxii baaxadda weynaa iyo afaf kale oo qaatay qaar ka mid ah kaalimihii uu AfSoomaaligu ku lahaa Jamhuuriyadda Soomaaliya. Taas ayaa keentay qayla-dhaan badbaado oo sannado soo socotay, inta badan Jabuuti xarun u ahayd, oo Madaxweyneheeda, Mudane Ismaaciil Cumar Geelle, hiil weyn ka geystey, Naadiga PEN ee qalinleyda Soomaaliyeedna kaalin hormuudnimo ka galay. Intaas oo isu tegay ayay ka dhalatay AGA. Xog intaas aad uga faahfaahsan, oo ku saabsan Akadeemidani waxa ay tahay, waxa ay u taagan tahay iyo waxa ay qabato, waxaad ka heli kartaa dagalka Akadeemiyada (www.aga.so) iyo baraheeda bulshada oo iyana ku sii lifaaqan.

## *"U HIILLI AFKAAGA HOOYO"*

## Himilada AGA
## (*vision*)

**Af Soomaaliga oo halista ka badbaada,**
**adeegsigiisa la xoojiyo lana saxo,**
**laga dhigto nabad-side walaaleeya Soomaalida**
**iyo idil ahaanba ummadaha Geeska Afrika.**

## Hawlgalka AGA
## (*Mission*)

**Ilaalinta afka hooyo, iba-furka hal-abuurkiisa**
**iyo turxaan-bixinta adeegsigiisa, qoraal iyo qawlba;**
**iyo inuu Af-Soomaaligu noqdo afka rasmiga ah**
**ee maamulka iyo waxbarashada geyiga Soomaalida.**

## Hadafka AGA
## (Main O*bjectives*)

- Daboolid baahida loo qabo madal kulmisa, dhiirrigalisa, kana miradhalisa waxqabadka dadka Soomaaliyeed ee Geeska Afrika iyo daafaha dunida ee waxtarka u leh daryeelka AfSoomaaliga iyo hal-abuurkiisa.
- Ka wacyi-galin ummad-weynta Soomaaliyeed qiimaha afkoodu ugu fadhiyo, halista ku soo fool yeelatay iyo baahida uu u qabo gurmad wadajir ah.
- U hawlgalid iyo dhiirrigalin cilmi-baaris dhinacyada kala duwan ee afka iyo hal-abuurkiisa.
- Dhiirrigalinta akhriska iyo kobcinta iyo hagidda da'da soo koraysa ee hibada u leh qoraalka iyo hal-abuurka loo adeegsanayo afka hooyo.

## QORMOOYIN HORTEBIN MUDAN

# Maalinta Caalamiga ah ee Afka Hooyo: Maxaad ka ogtahay? Maxaase naga dhexeeya?

Maadaama maalmahan ay badnayd hadal-haynta iyo u diyaar garowga xuska Maalinta Caamiga ah ee Afka Hooyo, 21 Febraayo 2018, qormadani waxay iftiiminaysaa sida dunidu u qiimayso maalintaas, sidii ay ku dhalatay iyo sababta maalintaas loo doortay.

21ka bisha Febraayo sannad kasta adduunweynuhu wuxuu u dabbaaldegaa xuska Maalinta Caalamiga ah ee Afka Hooyo. Ujeeddadu waa in la muujiyo qiimaha uu ummad kasta ugu fadhiyo afkooda hooyo, in ay qolo kastaa ilaashato afkeeda hooyo, horumarkiisana ku dadaasho; in la badbaadiyo afafka halista ku jira iyo in la ixtiraamo af kasta oo aadmigu leeyahay. Hay'adda UNESCO ee Qarammada Midoobay ayaa, ka dib markii ay cilmi-baaris ku ogaatey afafka dunida looga hadlo oo gaaraya 7000 kala bar in ka badan in ay ku dabar go'ayaan konton sano gudohood haddaan loo gurman, waxay qayladhaan gaarsiisay adduunweynaha. Taas ayaa sababtay in bishii November, 1999kii Golaha loo dhan yahay ee Qarammada Midoobay ku dhawaaqo in ay dunidu 21ka Febraayo u aqoonsato Maalinta Caalamiga ah ee Afka Hooyo, dal kastana laga xuso. Go'aankaas waa lagu dhaqmay laga soo bilaabo sannadkii 2000. Arrin xiisa leh waxaa ah in doorashada maalintaas ay ku timid warqad uu aqoonyahan reer Bangaaladhesh ah oo lagu magacaabo Sadiiqul Islaam kuna nool Kanada u qoray Xoghayihii Guud ee Qarammada Midoobay ee xilligaas, Kofi Anan, 9kii Janaayo, 1998. Sidiiqul Islaam warqaddaas wuxuu Qarammada Midoobay ku boorriyey in si loo badbaadiyo afafka dunida, loo asteeyo Maalin Caalami ah, maalintaasna lagana dhigo 21 Febraayo oo ah maalin taariikh lama illaawaan ah u ah dadkiisa.

Soojeedinta aqoonyahankaas afkiisa u qiirooday iyo aqoonsigii Qarammada Midoobay ee maalintaas, sababta keentay waxay tahay in 21kii Febraayo, 1952dii ay magaalada Daka ee Dalka Bangaladesh, ciidanka dowladdu ku laayeen arday samaynaysay bannaanbax ay ku dalbanayeen in afkooda hooyo oo ah Bengaali, ahna afka aqlabiyadda, looga dhigo afka waxbarashada, halka ay dawladda oo madaxdoodu ka soo jeedaan dadka ku hadla afka Urduu-ga ay khasab ka dhigeen Urduugu in uu noqdo afka rasmiga ah. Geesiyaal naftood-hurayaal ah, oo u badan dhallinyaro arday u sii badan, halgan ay muddo ugu soo jireen soo dhicinta xaqooda ah in afkooda wax lagu baro ayaa maalintaas gaaray heerkii ugu sarreeyey, halkaas oo lagu diley 9 arday, in ka bandanna lagu dhaawacay.

Innaga Soomaali ahaan, waxaa nasiibdarro ah, inaynaan afkeenna hooyo xil iska saarin, wax dadaal ahna gelin.

Waxaase xusid mudan, waxgarad Soomaaliyeed oo ay ugu horreeyaan Naadiga Somali PEN iyo Akadeemiye-Goboleedka AfSoomaaliga, muddo ka badan rubuc-qarni ay soo wadeen qayladhaan Soomaalida lagu baraarujinayo in loo gurmado badbaadinta iyo horumarinta afkeenna hooyo.

Sidaas ayay ahayd sidii gayiga Soomaalida looga bilaabay in sannad kasta 21ka Febraayo la isugu yimaaddo munaasabado dadka lagu wacyigelinayo qiimaha afkooda iyo gurmadka uu uga baahan yahay. Waxay ka bilaabantay magaala-madaxda Jabuuti sannadkii 2006. Waxayna ku bilaabantay qayladhaan iyo codsi qoraal iyo afba uu Guddoomiyihii Naadiga Qalinleyda iyo Hal-abuurka Soomaaliyeed (Somali PEN) Dr Maxamed Daahir Afrax, u gudbiyey Madaxweynaha Jamhuuriyadda Jabuuti, Mudane Ismaaciil Cumar Geelle. Dr Maxamed Daahir 12kii Oktoobar 2005tii ayuu Madaxweyne Geelle la kulmay, asagoo uu la socdo Xaashi Cabdillaahi Orrax. Wuxuu u gudbiyey qoraal dhawr iyo toban bog ka kooban (proposal) iyo warqad soo koobaysa oo uu Madaxweynaha, sharraaxaad dheer ka dib, uga codsaday in uu amar sharciyaysan ku bixiyo in Jamhuuriyadda Jabuuti sannad kasta laga xuso Maalinta Caalamiga ah ee Afka Hooyo. Madaxweyne Geelle, oo ah masuul afkiisa hooyo jecel, had iyo jeerna u heellan hiilka dhaqanka, afka iyo aqoonta, gacmo furan ayuu ku soo dhoweeyey soo jeedintii Guddoomiyaha Somali PEN, wuxuuna soo saaray Xeer Madaxweyne oo amraya in sannad kasta Jabuuti xus mug leh looga sameeyo munaasabaddaas, laguna bilaabo 21ka Febraayo 2006 oo ahayd tii ugu soo horraysey. Waxaa lagu daahfuray bandhig-dhaqameed lagu magacaabay *Toddobaadka Afka Hooyo*, laguna martiqaaday maskax-maal Soomaaliyeed oo ka kala yimid daafaha dunida. Sidii ayaa Jabuuti loogu dhaqmaa go'aankaas, sannad kastana laga xusaa munaasabaddaas. Ka dibna Naadiga PEN ee Qalinleyda iyo Hal-abuurka Soomaaliyeed ayaa wada gaarsiiyey geyiga Soomaalida ee Geeska Afrika. Muqdisho waxaa laga bilaabay 2007, waxaana hormuud ka ahaa Naadiga Somali PEN ee Koofurta Soomaaliya. Maantana, nasiib-wanaag, way yartahay magaalo weyn oo Soomaaliyeed oo aan laga xusayn munaasabaddan. Inta badanna waxaa hormuud ka ah Akadeemiye-Goboleedka Af-Soomaaliga.

**WQ. Axmed Maxamuud Dhicisow**

# Ra'iisalwasaare Xasan Cali Khayre oo u Hiilliyay Afka Hooyo

Ra'iisalwasaaraha Soomaaliya Mudane Xasan Cali Khayre ayaa faray wasaaradaha Xukuumadda Federaalka Soomaaliya inay qoraalladooda rasmiga ah ku qoraan Af Soomaali. Amarkan lagu xoojinayo adeegsiga afka hooyo, waxa uu soo baxay 03/4/2017.



Go`aankan oo ah kii ugu horreeyay ee uu Ra`iisalwasaaruhu soo saaro; waa mid loogu hiillinayo Af Soomaaliga, oo adeegsigiisu ku tabardarnaa xafiisyada dawladda, laguna taabbagelinayo fulinta dastuurka dalka.

Sida uu qeexayo qodobka shanaad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, Af Soomaaligu waa afka rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya. Afka rasmiga ahi waa afka ay tahay in lagu adeegsado maamulka iyo qoraallada xafiisyada dawladda ee kala duwan.

Ugu horaynba dastuurkii 1979 ayaa qeexay in Af Soomaaligu yahay afka rasmiga ah ee Soomaaliya. Sidoo kale, dastuuradii iyo axdiqarameedyadii ka dambeeyay way wada sheegeen maqaamka Af Soomaaligu yeeshay.

Hase yeeshee, wasaaradaha Dawladda ayaa laga adeegsadaa luqadda Ingiriiska oo inta badan qoraalladu ku qoran yihiin.

Amarkan uu Ra`iisalwasaaruhu ku soo rogay wasaaradaha xukuumaddu, waxa uu qayb ka yahay sidii kaalinta rasmiga ee AfSoomaaligu lahaa dib loogu soo celin lahaa. Waa arrin qayb ka ah hawlaha dibudhiska soo kabashada.

Akadeemiya-Goboleedka Af Soomaaligu, waxay ammaan iyo bogaadin u soo jeedinaysaa Ra`iisalwasaaraha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya mudane Xasan Cali Khayre; waxayna u aragtaa in tallaabadani tahay mid loo qaaday jihada saxda ah oo dhiirrigelin mudan.

# KULAN-AQOONEED LAGU MAAMUUSAYO MAALINTA CAALAMIGA EE BUUGGA

Kulan aqooneed lagu maamusayo Maalinta Caalamiga ee Buugga oo ay soo qabanqaabisay Akadeemiye-Goboleedka Af-Soomaaliga, oo kaashanaysa Akademiyada Cilmiga Fanka iyo Suugaanta iyo Naadiga Hal-abuurka iyo Qalinleyda Soomaaliyeed 'Somali-PEN' laanta Muqdisho, ayaa 23/4/2017 lagu qabtay xarunta AGA ee Muqdisho.

Munaasabaddan oo si qurux badan loo soo agaasimay, halkudheggeedu wuxuu ahaa "Tayaynta Qoraalka iyo Joogtaaynta Akhriska", waxayna ka dhacday xarunta AGA ee Muqdisho; waxaana ka soo qaybgalay xildhibaanno, madaxda labada akadeemiyo, bahda qalinka iyo qoraalka, abwaanno, naadiyada akhriska, aqoonyahanno, suxufiyiin iyo marti sharaf kale. Sidoo kale, goobta waxaa lagu soo bandhigay buugaag kala duwan.

Masuuliintii iyo waxgaradkii munaasabadda ka hadlay waxaa ka mid ah Guddoomiyaha Akadeemiya-Goboleedka Af-Soomaaliga Dr Maxamed Daahir Afrax; Gudoomiyaha Guddiga Warfaafinta, Wacyigalinta, Dhaqanka, Boostada iyo Isgaarsiinta Golaha Baarlamanka Soomaaliya Xildhibaan Khaalid Macow C/qaadir; Gudoomiyaha Akadeemiyada Cilmiga, Fanka iyo Suugaanta mudane C/qaadir Nuur Xuseen (Maax); Prof Mustafa C/laahi Fayruus oo ka tirsan xeeldheerayaasha AGA, mudane C/laahi Maxamed Sheegoow oo ah ruugcaddaa saxaafadeed; GuddoomiyekuXigeenka Golaha Abwaannada mudane Xirsi Dhuux Maxamed; Xoghayaha Naadiga Somali-PEN laanta Muqdisho, Mudane Axmed Maxamed Dhicisow; marwo Caasho Cabdi Diini.

Sannad kasta, maalinta 23 Abriil waxaa loo asteeyay "Maalinta Caalamiga ee Buugga" si la isu xusuusiyo qiimaha iyo qaayaha uu buuggu leeyahay, iyo kaalinta uu kaga jiro aqoonta iyo kasmada.

# KORORSO AQOONTA AFKAAGA IYO HAL-ABUURKIISA

# Ubucda Naxwaha AfSoomaaliga:

## Ambaqaad asaasi ah

Cilmiga Naxwuhu waa laan muhiim ah oo ka mid ah laamaha cilmi-afeedka. Waxyaabaha uu ka hadlo waxaa ka mid ah:

- Qaybaha hadalka iyo
- Weerraynta ereyada.

Qaybaha hadalku u kala baxo waxaa ka mid ah:

1. Magacyada;
2. Magac-uyaallada;
3. Qodobbada;
4. Tilmaamaha;
5. Falka;
6. Falkaabyada.
7. Meeleeyeyaasha.
8. Xiriiriyeyaasha iyo
9. Yaabka.

Marka aan mid mid u sii kala qaadno, sagaalkan xubnood oo hadalku u qaybsamo, waxaan ogaanaynaa mid waliba hawsha uu qabto.
Waxaan ku bilaabaynaa noocyada magacyada.

**Noocyada Magacyada**
*Magac muxuu yahay*?
Magac waa erey lagu kala sooco: *dadka*, *duunyada*, *meelaha, walxaha* iyo aragtiyaha kala duwan iwm.
Guud ahaan, magacyadu waxay u kala baxaan:

1) Magac gaar ah,
2) magac guud,
3) magac muuqda
4) Magac dahsoon,
5) magac kooxeed,
6) magac tirsama, iyo
7) Magac aan tirsamin iwm.

**1) Magac gaar ah.**
*Magac gaar ahi muxuu yahay?*
Magac gaar ahi waa magac gaar loo leeyahay oo aan la wadaagin sida: *Axmed Gurey, Xaawo Taako, Muqdisho, Hargeysa, Afgooye* iwm.
Axmed Gurey iyo Xaawo Taako waa laba magac oo ay lahayeen laba qof oo la wada yaqaan.
Magacyada: Muqdisho, Hargeysa iyo Afgooyena waa magacyo u gaara magaalooyin Soomaaliyeed.
Intaas aan ku dhaafno magacyada gaarka ah iyo waxa ay yihiin.

**2) Magac guud**
*Waa maxay magac guud?*
Magac guud waa magac aan cidina gaar u lahayn oo la wada wadaago, sida: m*agaalo, geed, webi, bad, nin, gabar, macallin, dal* iwm.
Magaca magaalo wuxuu ka dhexeeyaa magaalooyinka adduunka oo dhan. Magaca nin wuxuu ka dhexeeyaa oo wadaaga nin oo dhan. Waxaa la ah magaca geed iyo dhammaanba magacyada kale ee aan tusaalaha ku xusnay.
Haddii lagu yiraahdo “Macallin baa yimid”. Ma taqaanid macallinka yimid midka uu yahay. Waayo, ereyga macallin wuxuu ka dhexeeyaa macallimiinta oo dhan. Haddiise lagu yiraahdo “Macallin Muuse ayaa yimid”, waxaad garanaysaa macallinka yimid midka uu yahay. Waana taas ta ay ku kala duwan yihiin magaca gaarka ah iyo magaca guud.
Waxaan markan baranaynaa nooc saddexaad oo magac ah.

**3) Magac muuqda**
*Muxuu yahay magac muuqdaa*?
Magacyada muuqda waa qayb ka mid ah Magacyada guud. Waana magacyo la arki karo, lana taaban karo sida: *Buug, qalin, dhagax, guri, baabuur, koob, qaaddo, xeero, dheri, aashuun*.
Koob waa la arki karaa lana taaban karaa. Shaaha ayaan ku cabnaa koobka. Aashuun waa weel biyaha lagu shubto oo dhoobo ka samaysan, waana la taaban karaa lana arki karaa. Magacyada kale sida: xeero, dheri iyo gurina waa la mid.
Hadda waxaan guda gelaynaa barashada magacyada dahsoon.

**4) Magac dahsoon**
*Muxuu yahay magac dahsooni*?
Magacyada dahsooni waa magacyo dareenwadeyaasha lagu garto, oo aan la taaban Karin lana arki karin, sida: j*acayl, farxad, cabsi, daacadnimo, geesinnimo, naxariis* iwm. Jacayl waa la dareemaa keliya, ee jacayl lama taaban karo lamana arki karo.
Magac dahsooni wuxuuna ka mid yahay magacyada guud.

**5) Magac kooxeedyo**
*Magac kooxeed muxuu yahay*?
Magac kooxeed waa magac kulmiya kooxo dad ah, oo hawlo isku mid ah qabta sida: *guurti, gole, guddi, ciidan, xukuumad, urur, dad. Waxaa kale oo magac kooxeed, loogu yeeraa, marka xooluhu ay tiro buuxda gaaraan, sida: fadhi lo' ah, tiro ari, kadin geel* ah iwm.

**6) Magac tirsama**
*Maxay yihiin magacyada tirsamaa?*
Magacyada tirsamaa waa magacyo la oran karo, kow, labo iyo saddex iwm, sida: *laba buug, saddex qalin, afar nin, toban shimbirood* iwm.

**7) Magac aan tirsamin**
*Magac aan tirsamini muxuu yahay*?
Magac aan tirsamini waa magac aan la oran karin, kow, labo, saddex, afar iwm, sida*: ciid, sonkor, subag, malab, saliid, caano, hilib* iwm.
Waxaa jira hab lagu ogaado mugga iyo culayska ay leeyihiin magacyada tirsamaa sida: adeegsiga, koombada, kiilada, dhalada, litirka iwm.
*Waa Socotaa*

***WQ. Cabdullaahi Maxamed Sheegow***

# ISKUDHIGID KALA DHIHID:
## Awoodda Hab-dhawaaqa
## ee Bedelidda Macnaha Ereyga AfSoomaaliga

Af Soomaaliga erey-saleedyada gundhiga u ah waxaa ku jira ereyo badan oo *'isku dhigmo kala dhihid ah'*. Ereyada isku dhigmada ahi, kala dhihidooda ereyeed ayey micno kala duwan ku kala sameeyaan. Haddaba ereyada isku dhigmada ahi macnahoodu wuxuu ku xiran yahay codkooda hadba sida loogu dhawaaqo. Sidaa daraadeed, waxaa lama huraan ah in qof kasta si gaar ah u barto ereyada 'isku dhigmada kala dhihidda ah'. Ereyada isku dhigmada kala dhihidda ah, waxaa ka mid ah:

**Tusaale:**
- **Inan ama inan** {inanka ama inanta}.
- **Beer ama beer** {beerta ama beerka}.
- **Dul ama dul** {Dulka sanka ama dusha sare}
- **Duul ama duul** {duulidda hawada ama duulaan dagaal}.

Ereyada Madoobeysan ee qaybta hore waa ereyo isku dhigmo ah. Balse kala dhihiddooda micne kala duwan ku sameeya. Sida aad ku aragtaan qaybta labaad ee qoddobbeysan. Haddaba ereyada, **inan, beer, dul iyo duul.** Kala dhihiddooda ereyeed marka aan cilmiyeyno kala barashadooda waxay ku kala soocmaan ku dhawaaqidda codkooda ereyeed. Bal u fiirso tusaalooyinka soo socda:

1. **Inan:** ereygan kala dhihidda codkiisa marka aan cusleyno dhawaaqiisa, wuxuu noqonayaa wiil. {inankii baa yimid} Balse dhihiddiisa marka aan fududeyno codkiisa wuxuu noqonayaa gabar {inantii baan arkey}.
2. **Beer:** ereygan dhihidda codkiisa marka aan cusleyno dhawaaqiisa waxa uu noqonayaa beerka noolaha ama miraha qaarkood waxa ku jira ubucdooda oo iyana beer loo yaqaanno midkood. Haddaanse dhihiddiisa fududeyno codka dhawaaqiisa, wuxuu noqonayaa beerta la qoto ama la fasho.
3. **Dul:** ereygan isna dhihiddiisa marka aan cusleyno codkaca dhawaaqiisa waxa uu noqonayaa dulka sanka ama daloolka sanka. Haddaanse fududeyno dhawaaqa codkiisa wuxuu innoo sheegayaa dusha sare. Iwm.
4. **Duul;** ereygan isna kala dhihiddiisa marka aan cusleyno codka dhawaaqiisa wuxuu inoo tusmeynayaa duulaan iyo wixii la mid ah oo la qaado, wax kastoo lagu duulaba. Haddaanse codka dhihiddiisa aan fudeydeyno ku dhawaaqiddiisa wuxuu innoo sheegayaa duulid hawada ah sida baallaleyda duusha ama duulimaadka dayuuradaha iwm.

U fiirso weeraha soo socda oo dhuuxa:

1. **Inan** uu Warsame dhalay ayaan shalay arkay.
2. **Inan** bay ahayd weli aan qaan gaarin.
3. **Beer** shiilan i sii aan ku hamuun tiro.
4. **Beer** weyn baan Afgooye ku leennahay.
5. **Beer** qotada xilliga dayrta waxay tacbadaan Sisin.
6. **Dul** wax galay baan sahal looga bixin karin.
7. Wiilku waan la yaabay **dul** iyo adkaysi badanaa,
8. Libaax **duul** aan aqoon baan lax ka rita.
9. Hub la'aan baad **duul** i leedahaye, maxaan ku dagaal tagaa.
10. Shinbir **duulduul** badan mar buu af libaax. ku degaa
11. Laba **jeer** caanaha cantuug ama ka badso waad naaxaysaaye.
12. Laba **jeer** ah ayaa webiga ku jirta.

Dhammaan ereyada la madoobeeyay ee ku jira weeraha kor ku taxan, sida **inan, beer, dul, duul, jeer,** waa ereyo isku dhigmo kala dhihid ah, sida aad ku aragtaan kala duwanaanshaha adeegsiga weerayntooda iyagoo aan qodob raac lahayn. Marka aanse qodobbaynno waxay kala noqonayaan eray kastoo isku dhigma ahi kala dhihiddiisa lab iyo dheddig, sida: **i**nanka, inanta, beerka, beerta, dulka, dusha, duulaanka, duulidda,

**Layli:** Dhammaan ereyada soo socda, waxay ka mid yihiin ereyada isku dhigmada kala dhihidda ah. Haddaba labadii erey ee isku dhigma ahiba mid waliba goonidiisa u geli weerta ku habboon. Tusaale ahaan, sida:

**Gees ama gees** {gees xoolaad ama gees dhinac u leexasho}

1. Dibi geeso dhaadheer baa iga lumaye, ma aragteen wax baadiya cid sheegaysa.
2. War gondahaaga uun ha eegine, gees iiga leexo.

**Fool ama fool.** {foolka wejiga ama foosha}

**Doon ama doon.** {ariga doonka ah ama weydda ah iyo doonta}

**Feer ama feer.** {saableyda feeraha ama feer la dhicid}.

**Shilin ama shilin.** {shilin Soomaaliga ama shilinta xoolaha dhiigga ka nuugta.

Ereyada soo socda waa kuwo isku dhigmo kala dhihid ah, labadii isku dhigma ahiba, isla geli weero ku habboon tusaale ahaan.

**Burcad ama burcad** {subag burcad ah iyo burcadda wax dhacda}

**Tuur ama tuur.** {tuurka tinta iyo tuurta qofku yeesho}.

**Suul ama suul.** {suulka faraha ama suulin}

1. Qumbe subag burcad ahi ka buuxo, ayay burcaddii naga dhacday.
2. Wiilka tuurka weyni, tuur buu leeyahay.
3. Odayaashii degaanka waxay maanta suulka wada saareen, sidii xumaanta looga suulin lahaa bulshada.

**Dameer ama dameer.** {dameerka iyo dameerta}.

**Oon ama oon.** {oonta la quuto iyo oonka biyaha}

**Taag ama taag.** {taagga kore, meel sare iyo taagta qofka}

**Gaari ama gaari.** {gaariga ama baabuurka iyo gaarida haween}.

**WQ. Cabdullaahi Cabdi Aadan (Gacanka )**
**E-Mail: gacankalfle@gmail.com**

# HODANTINNIMADA AFKA HOOYO

AfSoomaaligu waa af hodan ka ah xagga erayada, dhismaha naxwaha iyo suugaanta iyo xag walba.

Bal aan dhowr tusaale ka soo qaadanno hodantinnimada afkeenna hooyo.

**Gooraynta socdaalka**

Soomaalidu socdaalkeedu mid waliba waxa uu leeyahay magac u gaar ah, oo tilmaamaya waqtiga la safrayo, haddii ay tahay aroor hore, xilli kulul, habeen madow, iwm.

Safarka aroortii hore magacyo badan ayuu leeyahay waxaana ka soo qaadan karnaa jarmaado, kallahaad, hiiraysi. Safarka duhurkii ah waa dhalandhool. Safarka galabtiina waa carraabo. Safarka habeenkiina waa guurayn.

**Sarbeebta**

Sarbeebtu waxay ka mid tahay siyaabaha af Soomaaligu hadal dedan farriimaha ugu gudbiyo, tusaale ahaan:

Suuldhabaale waa hadal, haddana waa si gooni ah; Sanqashaduna waa hadal, haddana waa si gooni ah. (Xigasho, hees ay wada qaadaan C/raxmaan dheere iyo Sahra Axmed).

"Inay Siigo Boor tahay,
Saxan saxo udgoon tahay,
Ila garo saluuglaay!"
"in sibraar muggii yahay,
Oon saa'id lagu darin,
Ila garo saluuglaay"
(Hees uu qaado Cumar Dhuulle Cali)
"Dhagax dhuunta mamaro,
Dhaayahaad ku aragtaa?
Wax dhintay waad ka samirtaa
Rajo waa la dhawraa".
(Hees uu qaado Daa'uud Cali Masxaf)

**Erayada xiriirka qoyska**

Hodantinimada Af Soomaaliga waxaa ka mid ah erayada loo adeegsado xiriirka xubnaha qoyska. Af Soomaaligu waxa uu leeyahay [in ka badan] 22 magac oo mid waliba goonidiisa u taagan yahay, waxaana ka mid ah: hooyo, aabbe, habaryar, eeddo, aayo, abti, adeer, ayeeyo, abooto, awoowe, seeddi, dumaashi, soddoh, soddog, dangalo, oori, walaal, rajay, agoon, madi, xigsiisan ama illintira.

**Maalmaha tagay iyo kuwa soo socda**

Hodantinnimada afka waxaa ka mid ah maalmaha tagay iyo kuwa soo socda, waxa ay leeyihiin magacyo u gooni ah, waxaana ka mid: maanta, shalay, berri, dorraad, saadambe, iyo saakuun.

**Maahmaahyada**

Dhanka kale haddaan ka eegno, hodantinimada afka waxaa ka mid ah maahmaahyada soomaalida oo xigmadi ka buuxdo, tusaale ahaan maahmaahda oranaysa:-

"Miro gunti ku jira kuwa geed saaran looma daadsho" Maahmaahdaan waxaa loogu maahmaahaa marka la arko cid wax ay haysato dayacaysa, iyadoo ciddaasi is leedahay hel wax kale oo ay u aragto inuu uga roon yahay waxa ay dayacayso; laakiin aanay isku hubin helidiisa.

Maahmaahdani waxay tusaale u tahay hodantinnimada afkeenna hooyo.

Afka hooyo horumarintiisa cid walba waxaa ka saaran masuuliyad gaar ah.

Afkaaga ayaa ku bara afaf kale. Qoraalka farta hooyo bar ama baro. Afku waa magacaaga, fartuna waa sumaddaada. Afkaaga ilaali afafka kalana baro.

***WQ. Cabdinaasir Yuusuf Macalin (Ganey)***
***E-Mail: cnaasir114@hotmail.com***

# WARARKA WAXQABADKA AGA

## Guddoomiyaha Aqalka Sare oo Daahfuray Madasha AGA ee Horumarinta Afka Hooyo iyo Hal-abuurkiisa

Munaasabad si qurux badan loo soo agaasimay, looguna tala galay daahfurka Madasha AGA ee Horumarinta




Afka Hooyo iyo Hal-abuurkiisa, ayna ka soo qaybgaleen madax ka kala socotay Aqalka Sare, Golaha Wasiirada, Xildhibaano, masuuliyiinta Akadeemiye-Goboleedka AfSoomaaliga, aqoonyahanno iyo marti sharaf aad u fara badan, ayaa Muqdisho lagu qabtay 28/12/2017.

Gudoomiyaha Akademiye-Goboleedka AfSoomaaliga Dr Maxamed Daahir Afrax oo khudbad qiime badan ka soo jeediyay munaasabaddan daahfurka madasha, ayaa si faahfahsan uga hadlay taariikhda iyo heerarka ay soo martay Akadeemiya-Goboleedka Af-Soomaaliga, oo magaceeda loo soo gaabiyo AGA. Waxa uu sheegay sababta loo yagleelay AGA inay tahay sidii halista looga badbaadin lahaa afka hooyo, looguna hawlgeli lahaa daryeelkiisa iyo horumarintiisa; isagoo intaasi ku daray in himilada Akadeemiyadu ay tahay sidii afka Soomaaliga looga dhigi lahaa nabad-side walaaleeya ummadda Soomaaliyeed.

“Madasha aan maanta Muqdisho ka furayno waa madal aqooneed bille ah, hadafkeedu waa fuddudaynta feker-wadaag ku wajahan sidii sare loogu qaadi lahaa afka hooyo iyo hal-abuurkiisa” ayuu yiri Dr Afrax.

Gudoomiyaha Aqalka Sare Mudane Cabdi Xaashi C/llaahi, oo si rasmi ah ugu dhawaaqay daahfurka madal-aqooneedkan, ayaa sheegay in uu ka welwelsan yahay xaaladda uu xilligaan ku sugan yahay afka Soomaaliga, waxaana uu ku baaqay in laga hortago waxyaabaha wiiqaya kaalinta afka hooyo ka mudan yahay nolosheenna; isagoo dhanka kale u mahadceliyay Akadeemiya-Goboleedka Af Soomaaliga, oo uu tilmaamay inay u heellan tahay u adeegidda afka hooyo iyo hal-abuurkiisa.

Wasiirkii Warfaafinta ee xilligaas Inj C/raxmaan Cumar Cusmaan (Inj. Yariisoow), oo isna munaasabadaasi ka hadlay, ayaa bogaadiyay barnaamijkan aqoonisweydaarsiga ah ee ay daahfurayso Akadeemiya-Goboleedku Af Soomaaligu, waxaana uu hoosta ka xarriiqay in wasaaraddiisa ay ka go’an tahay inay Akadeemiyada AGA kala shaqayso ilaalinta iyo u-adeegidda afka hooyo.

Guddoomiyaha Jaamacadda Ummadda Soomaaliyeed Bare Sare Maxamed Axmed Jimcaale, Gudoomiyaha Haweenka Gobolka Banaadir marwo Jawaahir Maxamed Baarqab, Gudoomiye ku-Xigeenka Golaha Abwaannada Soomaaliyeed Abwaan Xirsi Dhuux Maxamed; ayaa dhammaantoodba sheegay inay aad ugu faraxsan yihiin daahfurka kulan-aqooneedkan. Dhammaanba masuuliintani waxay caddeeyeen inay si dhaw ula shaqayn doonaan Akadeemiye-Goboleedka AfSoomaaliga.

Bare Sare Mustafa Fayruus iyo Bare Sare Maxamed Cali Kalaay oo ka mid ah masuuliyiinta Akadeemiyada AGA ayaa si faahfaahsan u iftiimiyay hawlaha uu qaban doono kulan-aqooneedkan billaha ah.

Madal-aqooneedkan waxaa si joogtaysan ugu kulmi doona bahda Akadeemiya-Goboleedka, ehelada AfSoomaaliga iyo suugaantiisa, bahda dhaqanka iyo aqoon-faafinta, bahda waxbarashada iyo cilmi-baarista, bahda warbaahinta, iyo guud ahaanba inta ku hawlan ama jecel afka, hal-abuurka, dhaqanka , qoraalka iyo aqoonta. Waxaa si gaar ah uga faa`iidaysan doona dadka ay ugu horreeyaan da`yarta xiiseeya akhriska iyo qoraalka Af Soomaaliga.

Xafladda daahfurka ‘Madasha AGA ee Horumarinta Afka Hooyo iyo Hal-abuurkiisa’ oo ku dhacday jawi aad u wanaagsan ayaa abwaanno kala duwan, oo ka tirsan Golaha Abwaannada Soomaaliyeed, waxa ay ku soo bandhigeen suugaan ka hadlaysay qiimaha iyo hoddontinimada afka hooyo.



# KULAN AQOONEED KU SAABSAN TURXAANBIXINTA ADEEGSIGA AFSOOMAALIGA




Kulan aqooneed ku saabsan "Turxaanbixinta Adeegsiga Af-Soomaaliga iyo Tayaynta Ereyga Qoran" oo ay soo agaasintay Akadeemiye-Goboleedka Af-Soomaaliga, ayaa Muqdisho lagu qabtay 23/11/2017.

Kulankan waxaa ka soo qayb galay aqoonyahanno, masuuliyiin, abwaanno iyo dadweyne ka kala socday qaybaha bulshada, gaar ahaanna dhallinyarada daneeya akhriska iyo qoraalka Af-Soomaaliga iyo hal-abuurkiisa.

Guddoomiyaha Akadeemiye-Goboleedka Af-Soomaaliga. Dr Maxamed Daahir Afrax, oo hadal ka jeediyay furitaankii aqoonisweydaarigan, waxa uu ka warbixiyay baahida keentay yagleelidda Akadeemiya-Goboleedka, hawsha loo igmaday iyo himilooyinka ay tiigsanayso. Waxa uu booriyay in loo wada istaago sidii loo dhowri lahaa, loona kobcin lahaa adeegsiga afkeenna hooyo.

Agaasimaha Guud ee Wasaaradda warfaafinta, Dhaqanka iyo Dalxiiska, mudane Cabdiraxmaan Yuusuf "Al-caddaala", oo isna goobta ka hadlay, waxa uu bogaadiyay dadaalka Akadeemiye-Goboleedka Af-Soomaaliga ee ay ugu hiillinayso afka hooyo iyo hal-abuurkiisa.

Agaasimuhu wuxuu ballanqaaday in Wasaaradda Warfaafintu ay si buuxda ugala shaqayn doonto Akadeemiya-Goboleedka u hiillinta afka hooyo."Akadeemiya-Goboleedka waxaa loo diray hawl muhiim ah oo culus.Sidaas darteed, Wasaaradda Warfaafintu taageero hiil iyo hoo ah ayay la garabtaagan tahay Akadeemiyada" ayuu yiri Agaasime Al-Caddaala.

Agaasimaha Tacliinta Sare ee Wasaaradda Waxbarashadda iyo Tacliinta Sare, Dr Cabdishakuur Sheekh Xasan, oo isnagoobta ka hadlay, waxa uu tilmaamay baahida weyn ee loo qabo kulan-aqooneedyada noocan oo kale ah. Waxaa kale oo uu sheegay in dhankooda ay ku garabtaagan yihiin Akadeemiya-Goboleedku hawsha ay ummadda Soomaaliyeed u hayso, waxa uu ku daray "in aan la illoobi doonin oo ay taariikhdu xusi doonto".

Ka dib, waxaa la gudagalay falanqaynta iyo doodaha mawduuca la isugu yimid, oo ah "Turxaanbixinta Adeegsiga Af-Soomaaliga iyo Tayaynta Ereyga Qoran".

Dooddan oo uu daadihinaya Bare Sare Mustafa Cabdulaahi Fayruus, guud ahaanba dadweynihii kala duwanaa eek a soo qaybgalay, si firfircoon ayay uga qaybqaateen lafaguidda mawduuca; waxaana halkaa la isku weydaarsaday xog iyo talooyin waxku-ool ah.

Aqoonyahanno iyo masuuliyiin kala duwan ayaa aqoonisweydaarsiga kaalin muuqata ka qaatay, waxaana ka mid ahaa Guddoomiyaha Golaha Abwaannada Soomaaliyeed, Xirsi Dhuux Maxamed iyo Marwo Dahabo Sheekh Maxamuud oo ka socotay Naadiga SomaliPen.

# TABABAR KU SAABSAN HAL-ABUURKA QALINKA



Tababar aqoon-kordhin ah oo ku saabsan hal-abuurka qalinka, oo ay soo agaasintay Akadeemiye-Goboleedka AfSoomaaliga, ayaa lagu qabtay Xarunta Naadiga Ifiye 12/8/2017.

Tababarkan waxaa loo qabtay dhallinyaro ka kala socdey naadiyada akhriska iyo qoraalka ee Muqdisho ka hawlgala.

Guddoomiyaha Naadiga Ifiye, mudane Maxamed Cali Gurey, oo hadal ka jeediyey furitaankii Tababarkani, waxa uu tilmaamay qiimaha uu Tababarkani u leeyahay guud ahaan dhallinyarada, gaar ahaanna kuwooda dhallinyarada hal-abuurka leh ee wax qora.Waxaan ballanqaadaynaa in casharrada tababarkanaan sii gaarsiinno dhallinyarada kale ee aan nasiibka u helin fursadan" ayuu yiri Maxamed Cali Gurey.

Casharro ku saabsan hal-abuurka qalinka, waxaa tababarka ka soo jeediyay Guddoomiyaha Akadeemiye-Goboleedka Af-Soomaaliga Dr Maxamed Daahir Afrax iyo Bare sare Mustafa Cabdulaahi Fayruus oo ka tirsan xeeldheerayaasha Akadeemiya-Goboleedka.

Gebagebadii tababarka, waxaa soo xiray Guddoomiyaha Akadeemiya-Goboleedka Af-Soomaaliga Dr Maxamed Daahir Afrax,oo dhallinyarada kula dardaarmay inay tayeeyaan qoraalkooda."Tababarkani wuxuu bilow u yahay Tababarro noocan ah oo Akadeemiya-Goboleedku ku qaban doonto dhammaanba degaannada Soomaaliyeed ee ay ka hawlgasho" ayuu yiri dr Afrax.

# Tababar ku Saabsan Fanka Qoraal-Curinta oo Garoowe lagu Qabtay

Tababar aqoon kordhin ah, oo ku saabsan fanka qoraal-curinta,ayaa lagu qabtay magaalada Garoowe 08/6/2017.



Tababarkan, oo ay soo wada agaasimeen Akadeemiye-Goboleedka Af-soomaaliga iyo SCANSOM, waxaa loo qabtay da'yarta soo koraysa oo hablo iyo wiilalba leh.Da'yartani waxay isugu jireen, qaar hore wax u qoray oo faafiyey qoraalkooda, kuwo hiigsanaya in ay wax qoraan oo ay ku biiraan qalinleyda, iyo kuwo jecel akhriska iyo qoraalka.

Furitaankii tababarkani waxaa ka hadlay Agaasimaha Shirkadda Daabacaadda iyo Faafinta ee SCANSOM,mudane Siciid Maxamed Sheekh Xasan, oo bogaadiyay tallaabadan Akadeemiya-Goboleedka Af-Soomaaligu ay dhallinyarada Soomaaliyeed u qabanayso tababarro sare loogu qaadayo xirfaddooda qoraalka iyo curinta.

Tababarkan waxaa casharro ah fanka qoraal curinta ka soo jeediyay Guddoomiyaha Akadeemiya-Goboleedka Af-Soomaaliga DrMaxamed Daahir Afrax.Gaar ahaan, waxa uu diiradda saaray fanka sheeko qorista.

Kaqaybgalayaasha oo si firfircoon uga qaybqaadanayay tababarkani, waxay ka mahadceliyeen casharrada ay qaateen iyo duruusta ay tababarkan ka faa`iidaysteen.

# XAFLADIHII SANNADKA 2017 EE XUSKA MAALINTA AFKA HOOYO

Sida sannad kasta la sameeyo, sannadkii tagey ee 2017 xartunta dhexe ee Akadeemiye-Goboleedka AfSoomaalia ee Muqdisho iyo dhammaan laamaha AGA ee daafaha dunida (Afrika, Yurub iyo Amerika) waxaa lagu qabtay xaflado iyo fagaarayaal waaweyn oo ku saabsanaa xuska Munaasabadda Maalinta Caalamiga ah ee Afka hooyo.

Xafladahan waxaa looga gol leeyahay in dadka Soomaaliyeed lagu baraarujiyo inay ilaashadaan afkooda hooyo, ubadkoodana baraan.

Maalinta caalamiga ah ee afka hooyo, oo ah 21 Febraayo ee sannad kasta, sannadkan 2017 waxay ahayd maalin Talaado ah, oo ah maalin shaqo. Sidaas darteed, waxay noqotay in qabashada xafladaha lagu xusayo maalintan la qabanqaabiyo maalmaha shaqada fasaxa laga yahay.

Magaalooyinka Yurub ee sannadkii 2017 lagu qabtay xafladaha maalinta caalamiga ee afka hooyo, waxaa ka mid ahaa Oslo, Norway; London, UK; Helsinki, Finland; iyo Hague, Holland.

**Magaalada Oslo**, Norway, waxaa xafladda maalinta caalamiga ee afka hooyo la qabatay 18 Febraayo, waxaana ka soo qaybgalay dadweyne fara badan oo ka kala yimid magaalada Oslo iyo magaalooyinka kale ee u dhow ee dalalka Norway iyo Sweden. Xeeldheerayaal aqoonta afka, fannaaniin iyo waxgarad kale ayaa halkaa ka soo jeediyey casharro, guubaabo iyo hadallo qiime badan.

Qabanqaabada xafladdan ayaa waxaa iska kaashaday Akadeemiya-Goboleedka Af-Soomaaliga iyo iyo Ururka Qurbajoogta Soomaaliyeed (GSD).

**Magaalada Helsinki, Finland**, waxaa xafladda Maalinta caalamiga ee afka hooyo la qabatay 21 Febraayo. Xafladdan oo lagu qabtay maktabadda dhexe, waxaa ka soo qaybgalay dadweyne fara badan oo ka kala yimid magaalada Helsinki iyo magaalooyinka kale ee u dhow.

Barnaamijka xafladan oo sal looga dhigay ku barbaarinta carruurta afka hooyo, waxaa ka hadlay macallimiinta soomaaliyeed ee dugsiyada magaaaladaas wax ka dhiga iyo weliba waalidiin. Waxay tilmaameen kaalinta macallimiinta, waalidka iyo guud ahaan bulshada uga aaddan kor u qaadidda iyo dhowridda afka hooyo iyo sidii loogu gudbin lahaa looguna barbaarin lahaa jiilka soo koraya.

Waxaa carruurtii munaasabaddaas ka soo qeybgashay loogu qabtay halkaa barnaamij sheeko tebin ah si kor loogu qaado awooddooda akhris qoraal iyo barbaarintooda xagga dhaqanka.

**Magaalada London**, waxay xafladda Maalinta caalamiga ee afka hooyo ka dhacday 19 Febraayo. Xafladdan waxaa soo qabanqaabiyay laanta **AGA-UK**, oo ah laanta ugu ballaaran ee AGA ay ku leedahay Qaaradda Yurub, oo kaashanaysa Ururka Ladagaalanka Qabyaaladda (ATM), waxaana lagu qabtay xarunta ururka ATM.




Xafladdan waxaa ka soo qaybgalay dadweyne isaga kala yimid magaalada London, magaalooyinka kale ee dalkaa Ingiriiska iyo weliba dalka Talyaaniga. Xafladdan waxaa lagu qaadaadhigay xaaladda uu ku sugan yahay afka Soomaaliga iyo sida ubadka Soomaaliyeed ee qurbaha ku korayaa halis ugu jiraan inay lumiyaan afkoodii hooyo. Sidoo kale waxaa la isku baraarujiyay arrimo kale oo la xiriira afka iyo dhaqnka.

**Magaalada Hague, Holland**, waxaa xafladdii maalinta caalamiga ee afka hooyo ka dhacday 24 Febraayo. Xafladdani waxay ku beegantay Jimce lagu qabtay magaalada Den Haag (The Hague) ee Holland barnaamij caalami ah oo loogu magac daray "Freedom Book Fair" waxaana qeyb ka ahaa barnaamij loogu yeeray "Habeenkii suugaanta" balse ka koobnaa bandhig buugaag, gabayo, heeso, iyo hadallo kooban oo ku aadanaa sooyaalka afka dhaqanka iyo suugaanta soomaaliyeed. Munaasabaddaas ayaa waxaa aad u soo cammiray dhallinyaro fara badan oo xiisa u hayey afka, suugaanta iyo erayga qoran.

Dhallinyaradii ka soo qayb gashay, oo intooda badan ku dhashay kuna barbaaray qurbaha, ayaa waxay muujinayeen dareen iyo jacayl ay u qabaan afkooda hooyo iyo dhaqankaba; qaar ka mid ahina waxay halkaa ku soo bandhigeen suugaan kala geddisan.

Guud ahaan, xafladahan maalinta caalamiga ee afka hooyo, waxaa looga faa`iidaystay sidii jaaliyadaha Soomaaliyeed ee Yurub loogu baraarujin lahaa inay ubadkooda ku barbariyaan afka hooyo, kana digtoonaadaan inay afkooda lumiyaan.

Waxyaabaha sannadkaa xiisaha gaarka ah u yeelayey xafladahan ka kala dhacay meelaha kala geddisan ayaa waxaa ka mid ahaa iyadoo si toos ah looga daawanayey baraha bulshada.

Abaabulkaas ballaaran ee ay sameeyeen laamaha Akadeemiya-Goboleedka AfSoomaaligu ee Qaaradda Yurub, waxay ku mutaysteen in Guddoomiyaha AGA Dr. Maxamed Daahir Afrax uu hambalyo iyo bogaadin u soo jeediyey laamahaas iyo guud ahaanba intii gacan ka geysatay suuragelinta qabashada munaasabaddaas xusuusta mudan.

# Tababar-xirfadeed ay Akadeemiye-Goboleedka AfSoomaaligu u Faa'iidaysay Dhallinyarada Muqdisho

Tababar-xirfadeed ku saabsan qurxinta qoraalka AfSoomaaliga ayaa 7 Febraayo 2018 Magaalada Muqdisho loogu qabtay dhallinyarada jecel ama ku hawllan qoraalka iyo aqriska afka hooyo.

Tababarkan waxaa qabanqaabisay Akadeemiye-Goboleedka AfSoomaaliga (AGA), waxaana ka qaybgalay tiro ku dhow lixdan dhallinyaro ah oo isugu jirey wiilal iyo Gabdho.

Furitaankii hadal uu ka jeediyay Gudoomiyaha Akadeemiye-Goboleedka AfSoomaaliga Dr Maxamed Daahir Afrax wuxuu ku bilaabay soo dhaweyn ka qaybgalayaasha iyo hambalyo uu ku bogaadiyey Naadiga Hilin-hayaan dadaalka weyn ee ay ku jiraan iyo sida qaayaha leh ee ay uga soo qaybgaleen Tababarka iyagoo muujiyey xiise badan oo ay u hayaan aqoon-kororsiga, afkooda hooyo iyo qoraalkiisa.

"Tababarkani wuxuu furitaan u yahay taxane Tababarro sannadkan 2018 u qorshaysan inay hirgaliso Akadeemiye-Goboleedka AfSoomaaligu, dhallinyarada loogu talagalayna waxaa hormuud ka ah naadiyada akhriska iyo qoraalka oo uu safka hore kaga jiro Hilin-hayaan" ayuu yiri Dr. Afrax oo intaasi ku darey Tababarrada noocaan ah in ay ka shidaal qaadanayaan hal-ku-dhegga AGA oo ah ***"HADAFKAYAGU WAA HIILKA AFKA HOOYO IYO HAL-ABUURKIISA***".

Guddoomiyuha AGA oo hadalkiisa sii wata ayaa intaasi raaciyay himilada AGA in ay tahay kobcinta aqoonta da'yarta Soomaaliyeed u leeyihiin afkooda hooyo iyo hal-abuurkiisa dhihid iyo dhigaalba, ama ku hadal iyo qoridba intaba.

"maxaa yeelay, dhallinyaradu waa kuwa mustaqbalka leh ayna tahay in ay masuuliyadda koowaad iska saaraan ilaalinta iyo horumarinta afkooda hooyo iyo dhaqanka ummaddooda" ayuu yiri Dr afrax..




Gudoomiyaha Naadiga Hillin-Hayaan C/qaadir Cabdi Axmed (Jubba) oo isna halkaasi ka hadlay ayaa Akadeemiye-Goboleedka uga mahad celiyey Tababarkaas ay u qabatay dhalinyarada Naadigiisa, Guddoomiyaha oo hadalkiisa sii wata, waxa uu yiri: waana iyaga cidda loo tababarayo in ay la wareegaan akadeemiyadan iyo hoggaaminteeda, sida uu carrabka ku adkeeyey Dr. Afrax Wuxuuna si diirran akadeemiyada iyo hoggaamiyeheeda, Prof, Afrax uga mahadceliyey guud ahaan waxqabadka badan ee u adeegaya afka hooyo iyo gaar ahaan Tababarradii hore loo siiyey iyo taageeradii ay isla barbar taageen Naadiga Hilin-hayaan iyo da'yarta danaysa akhriska iyo qoraalka, isagoo ballan qaaday inay doorkooda ka qaadan doonaan daryeelka Afka Soomaaliga iyo qoraalkiisa.

Furitaankii munasabadaasi ka dib waxaa halkaasi ka bilowday casharro ay bixinayeen Macalimiiin ka tirsan Akadeemiye-Goboleedka AfSoomaaliga, kuwaasi oo kala ahaa Prof. Mustafa C/laahi Feyrus iyo C/laahi Sheikh Cabdi (Gacanka), duruustaas oo aad loola dhacay ayaa ku kala saabsanaa Dalaynta ama astaamaynta Qoraalka iyo Habeynta Hadalka.

# NAADIYADA AKHRISKA IYO QORAALKA OO SOO DHAWEEYAY MADASHA AGA

Shir aad looga hadlyay sidii ay isu kaashan lahaayeen Akadeemiye-Goboleedka AfSoomaaliga iyo Naadiyadda Akhriska, Qoraalka iyo Dhaqanka ayaa lagu qabtay Magaalada Muqdisho, 24kii Disember 2017. Gudoomiyaha AGA Dr Maxamed Daahir Afrax oo kulankaasi ka hadlay ayaa sheegay inuu si diiran u bogaadinayo Dhallinyarada u soo jeesatey Akhriska, Qoraalka iyo Dhaqanka, waxaana uu tilmaamay inuu gacmo furan ku soo dhaweynayo Naadiyada ay asaaseen Dhalinyaradaasi, isagoo ballan qaaday inay Akadeemiye-Goboleedku xoogga saari doonto dhiirrigelinta, tababaridda iyo gacan-siinta da'yartaasi hibada leh.

Gudoomiyaasha Naadiyada Hilin-Hayaan, Banaadir, Xamar iyo Ifiye oo iyaguna halkaasi ka hadlay ayaa sheegay inay soo dhaweynayaan Madasha AGA ee Horumarinta Afka Hooyo iyo Hal-Abuurkiisa, waxaana ay caddeeyeen inay diyaar u yihiin ka qeyb qaadashada Madashaasi iyagoo soo jeediyay in xil gaar ah la iska saaro illaalinta Afka Hooyo.

Himilada Akadeemiye-Goboleedka Af-Soomaaligu ayaa ah Af-Soomaaliga oo halista ka bad baada, adeegsigiisa la saxo lana xoojiyo, lagana dhigto Nabad-Side Walaaleeya Soomaalida iyo idil ahaanba ummadaha Geeska Afrika

# SHAHAADO SHARAF LA GUDDOONSIIYAY AGA

Naadiga Akhriska iyo Qoraalka Banaadir ayaa guddoonsiiyay Akadeemiya-Goboleedka Af-Soomaaliga shahaado sharaf 17/2/2018. Shahaado sharaftan oo AGA lagu maamuusayay, kaalinta ay AGA ka qaadato u hiillinta afka hooyo iyo hal-abuurkiisa darteed; gaar ahaan tababarrada iyo wacyigelinta ay la garabtaagan tahay dhallinyarada Soomaaliyeed iyo tayaynta adeegsigooda afka. Shahaada-sharaftan waxaa AGA u guddoomay Bare Sare Mustafa Fayruus.

Naadiga Akhriska iyo Qoraalka Banaadir wuxuu ka mid yahay naadiyada ugu firfircoon ee Muqdisho ka hawlgala, waxayna wadashaqayn la leeyihiin Akadeemiya-Goboleedka AfSoomaaliga.



# AGA OO HAMBALYO U DIRTAY GUDDOOMIYAHA GOBOLKA BANAADIR AHNA DUQA MUQDISHO




Markii Guddoomiyaha Gobolka Banaadir ahna Duqa Magaalada Muqdisho loo magacaabay Mne Cabdiraxmaan C. Cismaan "Dhicisow" AGA waxay u dirtay warqad hambalyo ah. Sabatuna waxay ahayd Cabdiraxmaan oo hore u ahaa saaxiibka AGA muujiyeyna dadaal badan oo uu ugu hiillinayo afkeena hooyo. Aagana waxaa caado u ah in ay tixgalin gaar ahaaneed siiso u heellaneyaasha hiilka afka hooyo. Warqaddu sidan ayay u qornayd:

"Anigoo ku hadlaya magacayga iyo magaca Akadeemiye-Goboleedka Af Soomaalia (AGA) naga guddoon Hambalyo kal iyo laab ah xilka cusub ee laguu magacaabay. Sidii aan kuugu soo qoray farriintii telefoonka, farxad iyo rayrayn aan la koobi karin ayay noo ahayd markaan maqalnay inaad noo noqotay Guddoomiyaha G/Banaadir iyo Duqa Muqdisho.

Shakila'aan tallaabadani waxay horseedi doontaa iskaashi iyo wada shaqayn dhow oo ay yeeshaan G/Banaadir iyo Akadeeliye-Gobleedka AfSoomaaliga.

Waxay guul u tahay arrimihii aynu ku hawlanayn iyo sii horumarinta taageeradii xilkasnimo ee aad awelba adigoo Wasiir ah la garab taagnayd howlaha horumarinta Afkeenna Hooyo iyo taageeridda Akadeemiyadiisa, iyadoo oo ay nasiib-wanaag tahay in magaalada Muqdisho lagu sharfay in loo soo raro xarunta dhexe ee Madal-Aqooneedan ka dhexaysa guud ahaanba Gayiga Soomaalida ee Geeska Afrika. Waxan kuugu ducaynaynaa in uu Ilaahay kugu guuleeyo xilkan culus ee xasaasiga ah ee laguu magacaabay.

Maxamed Daahir Afrax, PhD
Guddoomiyaha AGA

# AKADEEMIYE-GOBOLEEDKA AFSOOMAALIGA IYO WASAARADAHA WARFAAFINTA IYO WAXBARASHADA OO BAHWADAAG U NOQDAY DARYEELKA AFKA SOOMAALIGA

Kulamo kala goongooni ah, oo lagaga wada hadlayay xoojinta iskaashiga ku aadan u adeegidda Af Soomaaliga, ayay Akadeemiya-Goboleedku la kala yeelatay Wasaaradda Warfaafinta, Dhaqanka iyo Dalxiiska iyo Wasaaradda Waxbarashada iyo Tacliinta Sare.

Kulan laba-geesood ah oo ay isugu yimaadeen madax ka kala socotay Akadeemiye-Goboleedka AfSoomaaliga iyo Wasaaradda Warfaafinta Dawladda Federaalka Soomaaliya, loogana hadlayay sidii la isaga kaashan lahaa ilaalinta iyo daryeelka Afka Soomaaliga ayaa lagu qabtay xarunta Wasaaradda Warfaafinta ee Magaalada Muqdisho.

Guddoomiye Afrax oo ka hadlay kulankan ayaa hoosta ka xarriiqay inay lagama maarmaan tahay sidii Akadeemiyada iyo Wasaaradda Warfaafinta ay isaga kaashan lahaayeen kor u qaadida Afka hooyo. "AfSoomaaliga waa in maqaamkiisii hore lagu soo celiyaa, loona adeegsado si tayaysan oo sax ah. Taleefishinka Qaranka iyo Raadiyo Muqdisho waa inay ahaadaan Warbaahintii lagaga dayanayay horumarinta Afka Soomaaliga" ayuu yiri Dr. Afrax oo ku baaqay in la isu kaashado sidii loogu wada hiillin lahaa afka hooyo.

Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Warfaafinta Dawladda Federaalka Soomaaliya Cabdiraxmaan Sheekh Yuusuf "Al- Caddaala" oo isna munaasabadaasi ka hadlay ayaa sheegay inay bogaadinayaan dadaalka Akadeemiye-Goboleedka, waxaana uu caddeeyay in Wasaaraddu ay diyaar u tahay iskaashi buuxa oo ay Akadeemiya-Goboleedka la yeelato.

Dhinaca kale, kulan laba-geesood ah oo ay isugu yimaadeen Wasiirka Waxbarshada, Hiddaha iyo Tacliinta Sare iyo Gudoomiyaha Akadeemiye-Goboleedka AfSoomaaliga loogana hadlayay sidii ay labadda dhinac u yeelan lahaayeen wada shaqeyn ayaa lagu qabtay xarunta Wasaaradda Waxbarshada ee Magaalada Muqdisho.

Gudoomiyaha Akadeemiye-Goboleedka AfSoomaaliga (AGA) Dr Maxamed Daahir Afrax oo ugu horreyntii ka hadlay halkaasi ayaa sheegay inuu ku faraxsan yahay kualnka uu la yeeshay Wasiirka cusub ee Wasaaradda Waxbarashada, wuxuuna tibaaxay inuu ugu hambalyeynayo Wasiirka aqoonta iyo waayo aragnimada uu u leeyahay hawlaha Waxbarashada.

"Wasaaradda Waxbarashada waxaan ka codsanayaa inay ka qeyb qaato gurmadka loogu jiro ilaalinta iyo xoojinta adeegsiga AfSoomaaliga" ayuu yiri Dr Afrax.

Wasiirka Waxbarashada, Hiddaha iyo Tacliinta Sare Md Cabdiraxmaan Daahir Cusmaan, oo isna kulankaasi ka hadlay ayaa sheegay inuu soo dhowaynayo dadaalka iyo is xilqaanka ay Akadeemiye-Goboleedka AfSoomaaligu ku hawlan tahay. Wasiirku wuxuu caddeeyay in wasaaraddiisu hiil iyo hooba la garabtaagan tahay Akadeemiya-Goboleedka iyo hawlaha ay u hayso ummadda Soomaaliyeed.

Kulammadani waxay ka mid yihiin dadaalka ay, Akadeemiya-Goboleedka Af-Soomaaligu ugu jirto xoojinta wadashaqaynta iyo iskaashiga kala dhexeeya wasaaradaha iyo hay`adaha ka shaqeeya Af-Soomaaliga iyo hal-abuurkiisa ee ka dhisan guud ahaanba Geeska Afrika.

# WARAR KALE OO XUSID MUDAN

## KULAN AQOONEED KU SAABSAN ILAALINTA AF-SOOMAALIGA IYO QIIMAHA DHAQANKA

Kulan-aqooneed ku saabsan dhowridda iyo horumarinta Af-Soomaaliga iyo qiimaha dhaqanka, ayna qabashadiisa iska kaashadeen Akadeemiye-Goboleedka Af-Soomaaliga iyo Xarunta Dhaqanka iyo Cilmiga ee Aw Jaamac Cumar Ciise, ayaa lagu qabtay Xarunta Aw Jaamac Cumar Ciise ee Magaalada Nairobi, Kenya. Munaasabadii kulankaasi oo si qurux badan loo soo agaasimay ayaa waxaa ka so qayb galay qaybaha kala duwan ee bulshada Soomaaliyeed ee ku dhaqan Nairobi, aqoonyahanno, madaxda dhaqanka, abwaano iyo marti sharaf kale.

Kulan aqooneedkan waxaa saldhig u ahaa muxaadaro cinwaankeedu ahaa "Kaalinta Dhaqanka, Afka iyo Hal-abuurkiisa Suugaaneed ay kaga jiraan Horumarinta Ummadda iyo Hiigsiga Faca soo Koraya"

Hadal ay halkaasi ka soo jeedisay madaxa xarunta dhaqanka ee Aw-Jaamac, Fardowsa Jaamac ayaa sheegtay xaruntaas inay si faraxd leh ay ugu soo dhaweynayso Gudoomiyaha Akadeemiye-Goboleedka AfSoomaaliga Dr. Maxamed Daahir Afrax, oo booqasho-hawleed ku tagey Nairobi, iyadoo halkaasi ka caddaysay sida ay xaruntoodu raaliga uga tahay dadaalka ay Akadeemiyada AGA ugu jirto illaalinta iyo daryeelka afkeenna hooyo iyo hal- abuurkiisa.

## DAAHFURKA BUUGGA HAYBSO DHAQANKAAGA

Munaasabad lagu maamusayay Daah-furka Buugga Heybso Dhaqankaaga ayna soo qaban-qaabisay Jaamacadda Ummadda Soomaaliyeed ayaa galabta lagu qabtay Xarunta Jaamacaddaasi ay ku leedahay Magaalada Muqdisho.Furitaankii munaasabdaasi hadal uu halkaasi ka soo jeediyay Guddoomiyaha Jaamacadda Ummadda Soomaaliyeed Prof.Maxamed Axmed Jimcaale ayaa sheegay inay jaamacaddiisu ku faraxsan tahay daahfurka ay u samaysay Buugga Heybso Dhaqankaaga, waxaana uu carrabka ku dhuftay buuggaasi inuu xambaarsan yahay macluumaad aad u qiima badan oo loo baahan yahay in laga faa'iideysto, isagoo hoosta ka xariiqay Buuggaasi inuu yahay dhaxal ay leedahay bulshada Soomaaliyeed.

Gudoomiyaha Aqalka Sare ahna Qoraaga Buuggaasi Md Cabdi Xaashi C/llaahi oo isna munaasabadaasi ka hadlay ayaa ka sheekeeyeey sababaha ku dhaliyay inuu qoro Buuggaasi; waxaana uu ku nuuxnuuxsadey inuu Buuggaasi ka hadlayo arimo badan oo la xiriira Afka, Dhaqanka iyo Suugaanta, isagoo caddeeyay Buuggaasi inuu ugu talagalay sidii ay jiilalka dambe uga faa'iideysan lahayeen.Munaasabadaasi waxaa iyana ka hadlay Maareyaha Golaha Murtida iyo Wacyigalinta Abwaan Cusmaan C/llaahi Guure, Gudoomiye ku Xigeenka Jaamacadda Ummadda Md, Aadan Guuleed Shabeel, Maamulaha Madbacadii daabacday Buuggaasi Md, C/qaadir Shire iyo masuuliyiin kale, kuwaasi oo qoraaga Buugga ku hambalyeeyay soo saarsita Buuggaasi, iyagoo qiray Buuggaasi inuu yahay mid waxtar badan u lahaan doono shacbga Soomaaliyeed.

Buugga Heybso Dhaqankaaga oo ka mid ah Buuggaaga qiimaha badan ee muddooyinka dambe la soo saaro ayaa horey waxaa loogu soo bandhigay Magaalada Muqdisho iyo qaar ka mid ah Gobollada Soomaaliya.

## CASHO SHARAF AGA U SAMAYSAY QORAYAAL SOOMAALIYEED

Munaasabad lagu sagootinayay masuuliyiin ka mid ah Akadeemiye-Goboleedka Af Soomaaliga iyo qorayaal Soomaaliyeed uuna hormuud u ahaa Axmed Faarax Cali Idaajaa oo saldhiggiisu yahay Nairobi, ayaa waxaa soo qaban-qaabiyay Maamulka Xarunta Dhexe ee



Akadeemiyada AGA waxaana lagu qabtay Hotel Beach View, Magaalada Muqdisho.

Munasabaddaas oo ahayd mid lagu maamuusayey qorayaasha bahda AGA ee booqashada ku yimid Muqdisho ayaa waxaa la isku dhaafsadey sheekooyin isugu jiray taariikh, kaftan, xikmad iyo maad intaba.

Gudoomiyaha Akademiye-Goboleedka AfSoomaaliiga Dr Maxamed Daahir Afrax oo munaasabdaasi ka hadlay ayaa sheegay in AGA ay u taagan tahay ilaalinta, Daryeelka iyo Hal Abuurka Afka Soomaaliga.

Guddoomiye Afrax oo erayo qiiro iyo xusuus leh ku soo dhaweeyey qorayaasha martida ah ayaa wuxuu si kooban uga warramay waxqabadka AGA, martidana wuxuu u rajeeyey safar nabadeed in ay dib ugu noqdaan goobihiii ay ka kala yimaadeen.

Qoraaga weyn, Axmed Farax Cali (Idaajaa) oo ka mid ah maqaawiirta Akadeemiayada AGA, Maxamed Cabdullaahi Cartan oo ka mid ah Guddiga AGA ee Dalka Ingiriiska (UK) iyo madaxa Xarunta Dhaqanka ee Aw-Jaamac Cumar Ciise Marwo Fardowsa Jaamac oo iyaguna Madashaasi ka hadlay ayaa sheegay inay ku faraxsan yihiin munaasabdaasi loo sameeyay, waxaana ay carrabka ku adkeeyeen inay soo dhaweynayaan waxqabadka iyo horumarka ay sameysay AGA, iyagoo ballan qaaday inay horseed ka noqon doonaan daryeelka Afka Soomaaliga

## SUUGAAN: HAL-ABUURKA AFKA HOOYO

# Aqbalayoo Ajiibaye, Adeer AGA Waa Maxay? (Tix)

*Cabdirisaaq Ismaaciil Xaashi "Cirro"*

**Tixdan waxaa curiyey Cabdirisaaq "Cirro" 21/02/2014; waxaana uu ka soo jeediyay xaflad lagu daahfurayay Laanta Akadeemiya-Goboleedka Af-Soomaaliga ee Nayroobi Kenya.**

*Amakaag iyo iyo yaab*
*Irdho iyo ammuur culus*
*Arrin aan horaw dhicin*
*AGA-dani kamay iman*
*Mana ahan af guriyeed!*

-------- ()---------

***A**-da ugu horraysaa*
*Iftiin iyo aqoon iyo*
*Indhahoo la furo iyo*
*Akadeemi weeyaan*

-------- ()---------

***G**-du aagag dhawriyo*
*Obokh iyo Iimeey*
*Ijaariyo Amuumiyo*
*Afartii waryaadood*
*Eeriyay u tahay midab*

-------- ()---------

***A**-da ugu dambeysana*
*Isirkaan ka imid iyo*
*Kii nalagu abaabiyay*
*Afkii hooyo weeyaan!*

-------- ()---------

***"AGA"** erayadeedii*
*Unuggiyo salkeedii*
*Asalkiyo abkeedii*
*Kala aragtaye garo!*

-------- ()---------

*"AGA" waa astaan qaran*
*Urur bay u tahay magac*
*Afkeenay u tahay kobac*
*Ummadday u tahay hiil*
*Ubadkay u tahay korin*
*Ardayday u tahay hirad*
*Odayaday u tahay hibo*
*Islaamahay u tahay tookh*
*Afrikay u tahay guul*
*AGA AGA-deenii weeyaan*
*Allaylehe anaa iri!!*

# Mar Haddii Afkaygii la Qoray

Labaatan iyo laba aamustiyo, shaqal irmaaneeya
Amar iyo tilmaamiyo gudbiyo, aade iyo jooge
Iskudare, xiriiriyo falkaab, erayadeennii ah
Ebyaniyo haddaan magic-u-yaal, ku arkay Joornaalka
Mar haddii afkaygii la qoray, aabbe iyo hooyo
Mar haddaan amaahsigii ka baxay, lagu agoontoobay
Abaal weyn waxaa leh nimankii fartaa, soo abaabulayee
Amiirnimo sin iyo garab jirtay, nagu abuureene
Afafkaa qalaad iyo maxaa, eregta kuu dhiibay
Anaa macallinoo raba dad loo, furo iskoolaade!

**Waxaa tiriyay Cabdulle Raage Taraawil, 1972**

# Murti iyo Maahmaah

Saddex waa mugdi, saddex baa u maaro ah, saddex baa ka macaan, saddexna waa isugu mid.

B: Habbeen waa mudi, caddaa u maaro ah, dharaar baa ka macaan, ruuxii ka indho la`na waa isugu mid.

T: Abaari waa mugdi, caws baa u maaro ah, doog baa ka macaan, ruuxaan waxba u daaqayn waa isugu mid.

J: Colaadi waa mugdi, ergaa u maaro ah, nabad baa ka macaan, ninkii ku goblamayna waa isugu mid.

**Wax la yiri,**
ninkii afar calaamo laga helo, masuul ma noqdo,markhaatina ma galo.

Beenhawaas, Boolicune, Ballanfure, Bilataraar [dhaarjiidh].

# *Googaaleysi*

***Isku day inaad furto googaalahan!***

***Googaa:*** Wax cirka taar ku leh, dhulka taar ku leh, tagoogo orgi leh, tunka shaash ku leh.
***Cadallee:***

***Googaa:*** Wax siijeed dibi leh, soo jeed dibi leh, dhako salaaxan leh, ragga saydh saydha.
***Cadallee:***

***Googaa:*** Wiilkii bayle banka soo laaqi
***Cadallee:***

***Googaa:*** Dudumo yar hoosteed duumo kugu legeday
***Cadallee:***

# WAA MAXAY SUUGAAN?

Inta aynaan u gelin su'aasha ah waa maxay suugaan? Marka hore aan is yara dultaagno iftiiminta ereyga Suugaan macnafurka asalkiisii hore waxay u adeegsan jireen Soomaalidii hore. Ereyga Suugaan ma aha erey cusub oo waa soo jireen filweyn. Waana erey lahaa macnayaal kala duwan, looga kala adeegsan jirey geyiga soomaaliyeed, oo wey ku kala geddisnaayeen degaannadu isticmaalkiisa ereyeed. Inkastoo nuxur ahaan ay isugu macna dhowaayeen waxyaabaha ay u kala adeegsan jireen.
Tusaale ahaan degaannada qaarkood Suugaan waxaa looga yaqaanney dhulka meesha tigaadowday magoolka dhirta marka meel fog laga soo jeedaaliyo midabka madowgee ay yeelato, muuqaalka ugbaadkeeda. Waa tey oran jirtey sahan ilaaleeyey ama socoto soo aragtey meel heblaayo suugaan baa ku taal.
Degaannada qaarkoodna waxay u yaqaanneen, xilliga jiilaalka dheeraado oo uu dhulka daaqu ka idlaado. Meelaha cows ku harka ah, godimada biya qabadka leh sida: Waadiyada, dooxooyinka, toggaga iwm. Ee ay xoolaleydu isugu soo ururaan. Waxaa la oran jirey geel reer hebel meel heblaayuu suugaan ka daaqayaa. Sidoo kale degaannada qaarkood waxaa looga yaqaanney hadalka aan si fiican loo garin Karin ujeeddadiisa ee gunuunaca ah. Ninkii maahmaahey waa tuu yiri: ''Hilib sooryo maaha, doqoni sokeeya maaha, Suugaani hadal maaha''. Sidoo kale degaannada qaarkood Suugaan waxaa looga yaqaanney uduga saxansaxada roobka. Halka degaannada qaarkoodna looga wax yar. Isku soo wada duuboo macnayowgaa kala geddisan nuxur ahaanse aan kala fogeyn ayaa loo yaqaanney Suugaan oo loo adeegsan jirey.
Waxaa leys weydiin karaa, oo maangal ah. Haddii Suugaan sidaa loo aqoon jirey maxaa ka salguuriyey macnayowgii horey loogu adeegsan jirey ee ku sidkey waxa maanta loo yaqaanno Suugaan.ee ay caanka ku tahay Tusaale ahaan waqtigan aynu joogno, qof waliba oo Soomaaliyeedoo qaangaar ahi, marka ay dhegtiisu ku soo dhacdo Suugaan maqalkeeda durba wuu gartaa waxa ku soo maqan ee laga hadli doono iney tahay halabuurka iyo jaadadkiisa Sida gabay, geeraar, masafo, jiifto, hees, buraanbur iwm. Haddaba is weydiinta su'aashaa aan soo tiraabey ee kor ku xusan. Innagoon meel dheer u doonin jawaabteeda. Qoridii Af-Soomaaliga markii far loo yeeley dhigaalkiisa. Waxaa xigey taabagelinta manhaj ku saleynta afka hooyo waxbarashada aasaasiga ah ee dalka. Haddaba si loo kobciyo afka hooyo waxaa la sameeyey erey bixintii ugu badneyd goortaa oo lagu dejiyey manhaj dhammeystiran oo loo diyaariyey ubadka soomaaliyeed si ay afkooda hooyo wax ugu bartaan

**WQ. Cabdulaahi Cabdi Aadan (Gacanka)**

# GUDDOOMIYAHA AQALKA SARE OO DAAHFURAYA MADASHA AGA EE HORUMARINTA AFKA HOOYO IYO HAL-ABUURADIISA




# Goosanka Xarunta Dhexe ee AGA oo Xafiiska Muqdisho ku soo Dhoweeyay Macallin Siciid Saalax

Macallin Saciid Saalax Axmed oo ka tirsan Maqaawiirta (Ruug Caddayaasha) Akadeemiye-Goboleedka Af Soomaaliga AGA ayaa dhawaan mar uu safar ku yimid magaalada muqdisho waxaa uu soo booqday Xarunta ku meel gaarka ah ee Akadeemiyadu ay ku leedahay Magaalada Muqdisho.




Munaasabad kooban oo loogu tala galay soo dhaweynta Macallin Saciid Saalax ayaa lgu qabtay Xarunta AGA ee G/Banaadir, hadal uu halkaasi ka soo jeediyay Gudoomiyaha AGA Prof. Maxamed Daahir Afrax ayaa sheegay inay Akadeemiyadu ku farxasan tahay booqashada uu Macallin Saciid Saalax ku yimid Xafiisyada AGA ee Muqdisho, isagoo dhinaca kale si cilmiyaysan uga warbixiyay isbadaladii ay soo martey Akadeemiyada, shaqooyinka ay qabato xarunta AGA ee Muqdisho, qorshayaasha hor yaalo iyo dadaalka guud oo ay ugu jirto Ilaalinta iyo daryeelka Afka Soomaaliga.

Macallin Saciid Saalax Axmed oo isagana ka hadlay Munaasabadaasi ayaa caddeeyay inuu la dhacsan yahay sida Walaaltinimada iyo Saaxiibtinimada leh ee loogu soo dhaweeyay xarunta AGA ee Muqdisho, wuxuuna ku nuux-nuuxsadey Madaxda Akadeemiyada AGA inuu ugu mahad naqayo sidii qiimaha laheyd ee ay u soo dhaweeyeen, isagoo halkaasi ka ballan qaaday inu sii xoojin doono dadaalkii uu ugu jirey kor u qaadida Afkeena Hooyo.

Saciid Saalax Axmed waa Macalllin iyo Abwaan si baahsan caan uga ah guud ahaan caalamka gaar ahaan gayiga ay degto Soomaalida, Taariikh ahaan waxaa lagu xasuustaa Suugaantii uu tiriyay xillliyadii bariisamaadka, heesahiisa ayaa intooda badan waxay ka hadlayeen qiimaha Waxbarashada maadama uu ahaa Gudoomiyihii Kooxda **IFTIN** ee Wasaaraddii Waxbarashada Soomaaliya.

# Wali ma Akhrisatay Buug-cilmiyeedkan '*Afmaal*'?






***Taxanaha Afka iyo Suugaanta Soomaalida***
iyo buuggiisan koobaad

**About the** *Somali Language and Literature Studies Series*
**and this first book**

Buuggani wuxuu daah-furayaa silsilad la magacbaxday *Taxanaha Afka iyo Suugaanta Soomaalida*. Waa mashruuc cusub oo ay ku tallaabsatay Akadeemiye-Goboleedka Af-soomaaliga (AGA), ujeeddadiisuna tahay dhiirrigalinta, taageeridda iyo horumarinta dadaalka cilmiyeed ee ku wajahan darsidda iyo faafinta aqoonta ku saabsan afka, suugaanta iyo sooyaalka Soomaalida oo ay ka mid tahay taariikhdu.

In kastoo mudnaanta koowaad la siin doono buugaagta ku qoran Af-soomaaliga, haddana AGA waxay dhiirrigalinaysaa guud ahaanba cilmi-baarista iyo faafinta ku saabsan arrimaha kore, afkii ay doontaba ha ku qornaatee.

Buuggani wuxuu xambaarsan yahay dhawr iyo toban qoraal-cilmiyeed oo lagu darsayo Af-soomaaliga iyo suugaantiisa. Waa diraasado ka dhashay cilmibaaris ay si qota dheer uga shaqeeyeen xeeldheereyaal Soomaali iyo ajnabiba leh oo badankoodu safka hore kaga jira hormuudka xeeldheereyaasha ku can-baxay qoraallada noocaan ah. Waa cilmibaaris ugub ah oo la hubo inay wax weyn ku soo kordhin doonto aqoonta arrimahan, wax bandanna u faa'idayn doonto qof kasta oo daneeya Af-soomaaliga, suugaanta iyo cilmiga afafka.

AGA
Akadeemiye-Goboleedka Af-soomaaliga
32 Logements - B14 - Île du héron
PO Box 725 Djibouti, Republic of Djibouti
Website : www.somaliacademy.org
Mail : info@somaliacademy.org
Telephone/Fax: +253 21530828

ISBN : 978-2-9551925-0-4

